Itaalia

MINISTERO DELL'INTERNO

euaa EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad kayar tahay da'da 18 sano jir
- aad timaaday adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah
- aad codsatay magangelyo (oo sidoo kale loo yaqaan ilaalin caalami ah) Itaalia.

SOMALI

# TUSMADA


Adigu waad ku badqabtaa wadankan 3

Yaa ku caawin doona? 3

Waa maxay doorka masuulka sharci 3

Yaa kale ee ku caawin kara? 4

Maxaad heli doontaa? 6

Xuquuqda daryeel caafimaad 8

Ogeysii shaqaalaha iyo masuulka sharci 9

Qiimeynta waxa ugu wanaagsan ee laguu qaban karo? 10

Xuquuqda waxbarasho 10

Xuquuqda shaqo 11

Dhukumantigaaga magangelyo-doonka 11

Halkee ayaad joogi doontaa? 12

Maxaad samayn kartaa haddii qof si xun kuula dhaqmo? 13

Waa maxay waajibaadkaaga soo dhaweynta? 14

Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga? 15

Xeerarka codsashada magangalyo iyo safrida waddamada kale 16

Maxaa dhaca haddii aad u baxsatid mid ka mid ah waddamada eu+? 17

Yaa ku caawin kara haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka ay gaareen maamulku? 18

Maxaa dhaca haddii qaar ka mid ah taageerada la beddelo? 19

Faahfaahinta halka lagala xidhiidhayo 20

## ADIGU WAAD KU BADQABTAA wadankaN

Waxaad u sheegtay maamulka in aadan dib ugu laaban karin wadankaagii sababtoo ah waxaad gali kartaan khatar, isla markaana waxaad codsatay magangelyo. Waxaad tahay magan-galyo doon jooga [itaalia...] .

Waa caadi haddii wax kasta kugu cusub yahay. Waxaad ku badqabtaa wadankan oo ma noqon doontid kaligaa.

## YAA KU CAAWIN DOONA?

Yurub gudaheeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay carruur, wuxuuna xaq u leeyahay in la siiyo **taageero gaar ah**.



Sababtoo ah waxaad joogtaa halkan bilaa waalidiintaada, qofkale oo weyn oo loo yaqaan **masuul sharci** ayaa kaa caawin doona baahiyahaaga. Qofkan waa ka madax-bannaan yahay maamulka.

Haddii aadan weli la kulmin masuulkaaga sharci waxaad la kulmi doontaa iyaga sida ugu dhakhsaha badan.

Ilaa waqtigaas, maamulku waxay u magacaabi doonaan qof kale oo qaangaadh ah si uu kuugu taageero una matalo.

## WAA MAXAY DOORKA masuul sharci

Masuulkaaga sharci ayaa kuu sharxaya waxkasta oo aad u baahan tahay inaad ka ogaatid joogitaankaaga kaana caawinaya inaad u heshid jawaabo su'aalahaaga. Tusaale ahaan, sida aad u aadi kartid dugsiga, sida aad ula kulmi kartid dhakhtar, halka aad ku noolaan doontid, sida aad u heli kartid ama ula xidhiidhi kartid qoyskaagii. Shaqaale kale *ee xaruunta soo dhoweenta aad degentahay*] ayaa sidoo kale kaa caawin doona su'aalahan.

Masuulkaaga sharci/wakiilkaaga ayaa u sheegaya maamulka waxaad u baahan tahay, kaa siinaya talo kaana caawinaya sameynta go'aamada muhiimka ah.

Waxaad had iyo jeer sharixi kartaa baahiyahaaga iyo dareenkaaga oo u sheeg masuulkaaga/wakiilkaaga aragtidaada.

Haddii aad ku qabtid dhibaato masuulka sharci, usheeg shaqaalaha [*xaruunta soo dhoweenta*].

## YAA KALE EE KU CAAWIN KARA?



- **shaqaalaha bulshada** wuxuu kaa caawin doonaa baahiyahaaga maalinlaha ah ama wuxuu la xidhiidhi doontaa shaqaale kale oo kaa caawin kara dhibaato gaar ah.
- **Dhakhtar** ama **kalkaaliye** wuxuu ku caawin doonaa haddii aad dareento xanuun, aad dhaawacanto ama aad u baahan tahay nooc kasta oo kaalmo caafimaad ah.
- **Dhakhtarka maanka** wuxuu kaa caawin doonaa haddii aad dareento murugo, cadho, baqasho, welwel ama ay kugu adkaato hurdada.
- **Lataliye sharci** wuxuu kaa caawin doonaa adiga iyo qoyskaaga inaad fahamtaan waxa dhici kara inta lagu jiro habraaca magangalyada iyo haddii aad rumaysan tahay inaan xuquuqdaada la ixtiraamin.
- **Turjumaan** wuxuu kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqada aad fahmayso. Doorkoodu waxa weeye iney si sax u turjumaan waxa aad adiga ama dadka kale dhahdaan.

## Waa maxay qiimeynta da'du?




Haddii aad timid Yurub adoon wadan sharci cadeynaya intaad leeg tahay, oo maamulku ka shakiyo da'daada, waxay ku weydiin doonaan inaad kaqeybgashid nidaam loo yaqaan **qiimeynta da'da.** Qaabkani, waxay ku go'aamin karaan inay kuu tixgaliyaan ilmo yar ama aanay kuu tixgalin.
Haddii lagu weydiiyo inaad kaqeybgashid qiimeyn da'da ah, masuulkaaga sharci ayaa kuu sharxi doona nidaamka adiga.

## Maxaad sameyn kartaa haddii aad rabto inaad la xidhiidho qoyskaaga?



- Haddii aanad garaneyn halka uu joogo qoyskaagii, ama aanad ka hayn xidhiidh, waxaad weydiisan kartaa masuulkaaga sharci ama shaqaalaha caawimo. Waxay kaa caawin karaan raadinta qoyskaagii.
- Haddii aanad garaneyn halka qoyskaagii joogo oo aad ka haysid xidhiidh, shaqaalaha ayaa kaa caawin doona inaad wacdid haddii aad rabtid.
- Haddii qoys kuu joogo Yurub, u sheeg shaqaalaha [*xaruunta soo dhoweenta*] waxkasta oo aad ka ogtahay qoyskaaga.

## Iska taxadar, dadka qaarkood waxay ku galin karaan khatar



Waxaa laga yaabaa inaad ka fikirto ka bixitaanka dalkaas ama qaar ka mid ah dadka ayaa isku dayi doona inay kugu qanciyaan inaad ka cararto. Waxay kuu noqon kartaa khatar waxayna yeelan kartaa cawaaqib xun oo ku saabsan codsigaaga magangalyo.
Lahadal masuulkaaga sharci iyo shaqaalaha [*xaruunta soo dhoweenta*], waxaad u sharxi kartaa xaalada waanay kula talin karaan.

## MAXAAD HELI DOONTAA?

Waxaad heli doontaan noocyo kala duwan oo taageero iyo adeegyo ah intaad sugaysaan in maamulka baadhaan codsigiinna magangelyo. Tan waxa la dhahaa **soo dhawayn**.


Ka ilmo ahaan iyo magangalyo doon ahaanba waxaad leedahay xuquuqo laakiin sidookale waxa jira waajibaad ku saaran oo ay tahay inaad ixtiraamto. Kuwan waxa lagu sharaxay buug-yarahan.

Shaqaaluhu waxay kaa codsan doonaan inaad xaqiijiso inaad fahamtay macluumaadka ku jira buug-yarahan. Haddii aanad fahmayn qaybaha buug-yarahan ama haddii aad qabto wax su'aal ah, weydii masuulkaaga sharci iyo shaqaalaha [*xaruunta soo dhoweenta*].

Inta aad ku sugan tahay dalkan, masuulkaaga sharci iyo shaqaaluhu waxay ku siin doonaan macluumaad dheeri ah iyadoo ku xidhan xaaladdadaada. Waxaad weydiin kartaan su'aalo wakhti kasta.



**Waxaad heli doontaa**:



- goob aad seexataan



- cunto



- agabka nadaafada gaarka ah



- dhar



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

[*maamulka xaruunta soo dhoweenta ayaa habeeneysa qeybta sare iyadoo ilaalinaysa qodobada madow ee xeerka wadanka. Masuuliyiinta ayaa xaqiijin kara in shuruudaha qalabka qeybta soo-dhaweyntu loo bixin doono hadiyad, lacag ahaan, jeeg ama iskudarka saddexda ahaan. Sida ku xusan RCD 2024, MS waa inay bixiyaan hoy, cunto, dhar, alaabooyinka nadaafadda shaqsiga ah, iyo lacag maalinle ah oo kharashyada lagu dabooli karo, taasoo ay tahay inay ku jirto qadarka lacagta la bixinayo.*

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

**Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay daryeelka caafimaad ee aad u baahan tahay.**

**Waxaad ogeysiin kartaa shaqaalaha iyo masuulkaaga sharci wixii dhibaato caafimaad ee aad qabtid.** Waxay kaa caawin karaan inaad aragto dhakhtar ama kalkaaliye haddii aad u baahan tahay.




Haddii dhakhtarku u arko inay lagama maarmaan tahay, wuxuu qori doonaa daawooyin iyo sidoo kale booqashooyin aad ku arki karto dhakhaatiirta takhasuska gaarka ah u leh.

Shaqaalaha iyo masuulka ayaa kuu sheegi doonaa inaad kaqeyb gali doontid baaritaan caafimaad oo kalkaaliso ama dhakhtar sameeyo. Waxaa  baaraa lcaafimaadkaaga oo ay ku siiyaan kaalmada daruuriga ah ee aad u baahan tahay.

Haddii aad la kulanto xaalad caafimaad oo u baahan gargaar degdeg ah ama wax dhaawac u baahan daaweyn degdeg ah, u sheeg shaqaalaha. Haddii aad joogtid dibada meesha aad degan tahay, waxaad wici kartaa lambarka xaalada degdega ee bilaashka 112.

[*maamulka xaruunta waxay baddelaysaa macluumaad dheeraad ah oo khuseeya daryeelka caafimaad ee degdega.*]

## OGEYSII SHAQAALAHA IYO MASUULKA HADDII:



- aad dareemayso xanuun, dhaawacantay ama aad u baahan tahay gargaar caafimaad oo degdega ah ama daaweyn
- aad isticmaasho daroogo ama aad cabto maandooriye
- aad horey u soo martay dhibaato ama xadgudub, ama aad hadda la kulmeyso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- aadan kaligaa socon karin ama aad dhibaato ku qabto maqalka iyo aragga
- aad uwalwalsan tahay, murugaysan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad dareento inaanad ammaan ahayn ama aad ka baqanayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto.

Xasuuso, shaqaalaha [*maamulka xaruuta ayaa habeeneysa, tusaale iyadoo u tixgalinaysa 'dhakhtarka maanka' ee sare lagu sheegay marka laga yimaad shaqaalaha kale*] iyo masuulkaaga sharci oo u jooga halkan inuu ku caawiyo.



## QIIMEYNTA WAXA UGU WANAAGSAN EE LAGUU QABAN KARO?



Waa hawl halkaas oo aad arki karto shaqaalaha kale [*maamulka xaruunta waxay sii habeyn karaan haddii ay doonaan iyagoo ku daraya borofaylo gaara.* ] yaa ku weydiin kara su'aalaha si uu:

- u fahmo **baahiyahaaga**
- u go'aamiyo **taageerada** aad u baahan tahay.

Tani waxay ka caawin doontaa masuuliyiinta inay gaadhaan go’aanno muhiim ah, tusaale ahaan halka aad degi doontid.

Waad aamini kartaa kalkaaliyaha, dhakhtarka, shaqaalaha iyo masuulkaaga sharci Waxaad la wadaagi kartaa wax walba. [*dhowrida sirta*] Wax kasta oo aad tidhaahdo lama wadaagi doono cid kale marka laga reebo masuulkaaga/wakiilkaagaiyadoo aanu jirin heshiiskaagu. Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

Haddii aanad rabin in masuulkaaga la ogeysiiyo ama ku lug yeesho, u sheeg shaqaalaha. Waxay baadhi doonaan codsigaaga waxayna go'aamin doonaa waxa kugu habboon.

## XUQUUQDA WAXBARASHO



Ka ilmo ahaan waxaad xaq u leedahay waxbarasho iyo inaad wax dhigato. Haddii aad tagto dugsiga oo aad buuxiso 18 sano inta aad dhiganayso, waad sii wadan kartaa ilaa waxbarashadu kuu dhammaato.

[*maamulka xaruunta ayaa habaynaysa, iyadoo ku salaysan hawsha qaranka*] Masuulkaaga iyo shaqaalaha ayaa kaa caawin doona si aad iskaga diwaangaliso dugsi maxali ah. Waxay kugu wargelin doonaan fasallada diyaarinta luuqadda iyo koorsooyinka kale. Waxa laga yaabaa inaad ka qeybgasho qaar kamid ah koorsooyinkaan.

Shaqaaluhu waxay ku sheegi doonaan hawlaha waxbarasho iyo madadaalo si ay kaaga caawiyaan inaad barato, horumariso naftaada, isla markaana saaxiibo cusub sameysato.

# XUQUUQDA SHAQO

Iyadoo ku xidhan da'daada iyo xaaladdaada, waxaa laga yaabaa in laguu oggolaado inaad ka shaqeyso [Itaalia, haddii aad rabto. Masuulkaaga/wakiilkaaga iyo shaqaalaha [*maamulka xaruunta*] ayaa kusiin doona macluumaad dheeraad ah.







Dhammaan wiilasha iyo gabdhaha ku jira [...16] sanno looma ogola inay shaqeeyaan.

# DHUKUMENTIGAAGA MAGANGELYO-DOONKA

Waxaad heli doontaa dhukumenti gaar ah oo ay ku jiraan magacaaga iyo sawirkaaga. Tani waxay muujinaysaa inaad magangalyo raadiye Itaalia. Waa inaad had iyo jeer sidataa.



**Dhokumantigani waa muhiim.**
**Ka taxaddar inaadan lumin oo ha siin qof kale.**

Dhokumantiga waxa loogu yeedhaa [permesso di soggiorno...]

## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Meesha aad ku degi doonto inta maamulku baadhayo codsigaaga magangelyo waxay ku xidhan tahay xaaladaada.







Masuulkaaga iyo shaqaalaha maamulka xaruunta ayaa kugusoo wargalin doona **halka aad joogayso**, tusaale ahaan hoy gaar ah ama magaalo [ *waa in ay habayn ku sameeyaan, fadlan akhri tilmaamaha dheeraadka ah ee ku jira madasha "Faallooyinka"*].

**Adigu waxaa/laga yaabaa inaad hesho taageero iyo adeegyo kaliya marka aad degtaan goobta ay go'aamiyeen maamulku.**

Marar aad u yar, waxaa dhici karta in carruurta lagu dejiyo xarun aysan si xor ah uga bixi karin ama ugu laaban karin sida ay doonaan. Haddii aad ku sugan tahay xaaladdan, masuulkaaga, lataliyehaaga sharci iyo shaqaaluhu way ku caawin doonaan.

**Meel kasta oo aad deggan tahay, waxaad xaq u leedahay inaad badqabto. Qofna looma ogola inuu:**









ku cabsi galiyo | ku caayo | ku dhibaateeyo

Ha noqoto cidday doonaan, qof aad garanayso iyo mid aanad garanaynba. Haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto shaqaalaha ama masuulkaaga/ wakiilkaaga, codkaaga dhiibi kartaa.

## MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDII QOF SI XUN KUULA DHAQMO?



Waxaad la hadli kartaa shaqsi aad aaminsan tahay, shaqaale kale, masuulkaaga, ama [maamulka dowlada,UNICEF,UNHCR,OIM…] [*maamulka xaruunta ayaa habeeneysa, iyadoo magacaabaysa tusaale mid ka mid ah haayada gaarka ah iyadoo ku xidhan nidaamk* ]

Haddii qof si xun idiinla dhaqmo, waxaad ka dacwayn kartaan maamulka [*amniga*] si looga horgtago inay marlabaad dhacdo. Tan waxa loo yaqaanaa 'samaynta cabasho'.



**Fiiro gaar ah!**

Haddii aad ku sugan tahay goob ka baxsan meesha aad degan tahay oo aad khatar ku jirto, waxaad wici kartaa lambarka gargaarka degdegga ee heer qaran ee bilaashka ah 112 taleefan kasta.

## WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?



Waa muhiim inaad sheegto runta oo aad la shaqeyso maamulka, xitaa haddii mararka qaar ay cabsi iyo dhibaato kugu noqoto inaad sheekadaada sheegto. Adigu keliga ma tihid. Masuulkaaga Shaqaaluhuna halkan ayay joogaan si ay kuu dhageystaan oo ay kaaga caawiyaan baahiyahaaga maalinlaha ah. Shaqaaluhu way ku caawin karaan haddii ay ogyihiin xaaladaada.

Meel kasta oo aad degto, waxaa jiri doona xeerar ay tahay in la raaco. Tusaale ahaan, adigu waa inaad ixtiraamtaa dadka kale ee degan iyo shaqaalaha, sidoo kale waa inaad aamusto inta lagu jiro saacadaha kala hurdada .

Shaqaaluhu waxay sharraxi doonaan xeerarka iyo cawaaqibta ka dhalanaysa marka xeerarka la raaci waayo.

Waa muhiim in:

- ✔ aad raacdo xeerarka meesha aad degan tahay
- ✖ aadan ka baxsan goobta ay maamulku kuu sheegeen inaad joogto
- ✔ aad raacdo shuruucda dalka, kuwaas oo ay shaqaaluhu iyo masuul ayaa kuu sharixi doonan.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?



Haddii arrintan dhacdo, waxaad si furan ugu hadli kartaa masuulkaaga ama shaqaalaha maamulka xaruunta
oo aad sharaxi kartaa xaaladdaada iyo sababaha aad u lahayd.

Maamuuliyiintu waxay qiimayn doonaan xaaladdaada waxayna ku wargelin doonaan adiga iyo masuulkaaga haddii ay go'aansadaan inay tallaabo qaadaan.

Maamulku waxaa laga yaabaa inay go'aansadaan in:

- **Waxaa laga yaabaa inaad hesho taageero yar**, tusaale ahaan, haddii aad ka cararto meesha ay maamulka ku amreen inaad degto ama haddii aadan la shaqayn mas'uuliyiinta.
- **Waxaa laga yaabaa inaad lumiso qayb ka mid ah taageerada aad heshay**, haddii aad ku dhaqanto si rabshad leh ama haddii aad si joogto ah ama si halis ah u jebiso xeerarka meesha aad degan tahay. Booliska ayaa sidoo kale la wici kartaa.



**Adigu waxaad imika Itaalia, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+.**
**Waddamada EU+ waa:**

27 Dal ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czech Republic, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway iyo Switzerland.

## XEERARKA KU SAABSAN CODSASHADA ILAALINTA CAALAMIGA AH IYO U SAFARKA WADDAMADA EU+




Masuulkaaga **iyo shaqaalaha waxay kuu sharixi doonaan sharciyadan muhiimka ah. Waxaad weydiin kartaa iyaga su'aalo wakhti kasta.**

- ✅ Waa inaad joogto Itaalia oo waa inaanad u baxsan mid kamid ah waddamada EU+.
- ✅ Haddii xubno kamid ah qoyskaagu ku sugan yahay mid ka mid ah waddamadan, maamulku waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada ku saabsan isu keenista qoyska. Haka iska baxsan uun.
- ❌ Haddii aad baxsato, waxa jiri doontaa cawaaqib xun, kuwaas oo lagu sharaxay buug-yarahan. Tusaale ahaan, waxaad ka heli doontaa taageero yar oo soo-dhawayn ah wadanka kale.
- ✅ Xasuusnow, waa inaad ka diiwaangelisaa codsigaaga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timiday, haddii maamulku aanu kuu sheegin wax kale.
- ✅ Kaliya mid kamid ah waddaman ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo. Maamulka Itaalia ayaa kuu sheegi doona wadanka arrintan ka masuulka ah.

Waxaad ku baran doontaan habraacyadan buug-yarayaal gooni ah.

## MAXAA DHACA HADDII AAD U BAXSATID MID KA MID AH WADDAMADA EU+?




**gudaha [itaalia...]**

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**Inta aad joogtaan wadanka kale ee EU+ ah:**

- Maamulku waxay go'aansan karaan inay kugu celiyaan wadanka EU+ ee aad ka tagtay.

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli doontid noocyo kamid ah taageerada oo
- laguuma ogolaan doono inaad ka shaqaysato.

## YAA KU CAAWIN KARA HADDII AANAD KU QANACSANAYN GO'AANKA AY GAAREEN MAAMULKU?

Waxaad la hadli kartaa masuulkaaga oo aad weydiin kartaan su'aalahaaga.

Si wadajir ah masuulkaaga ayaad u weydiisan kartaa caawimo aad ka hesho lataliye sharci.

Lataliye sharci waa qof yaqaan shuruucda dalkaas, kaasoo daraasayn kara xaaladaada oo ku caawin kara.



Shaqaaluhu waxay kuu sheegi doonaan ururada aan dawliga ahayn kuwaasoo sidoo kale ku siin kara macluumaad iyo caawimaad.




Waxaad la xidhiidhi kartaa Hay’adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) wakhti kasta. UNHCR waxay ilaalisaa dadka lagu qasbay inay ka tagaan dalkooda.

## MAXAA DHACA HADDII QAAR KA MID AH TAAGEERADA LA BEDDELO?

Haddii maamulku [*prefatuurada*] Waxaa la go’aansan karaa in la xaddido ama la joojiyo noocyada qaar ee taageerada sababta oo ah xaaladda sida lagu sharraxay bogga [14…], waxaad awood u yeelan doontaa inaad:



- tagto dugsi



- aragto dhakhtar ama kalkaaliye oo aad hesho kaalmo caafimaad



- Hel caawimaad ku saleysan xaaladdaada iyo baahiyahaaga, taasoo macnaheedu yahay inaad hesho meel lagu seexdo oo ay maamulku go’aamiyeen iyo inaad hesho taageero qaar ah oo maamulka xaruunta ku siin doonto tusaale ahaan ,cuno iyo dhar la xirto

Marka maamulku go’aansadaan inay joojiyaan taageerada soo-dhaweynta ee lagu siiyay sababtoo ah waxaad ka carartay oo u guurtay waddan kale oo EU+ ah, nooca taageerada aad weli heli doonto wuxuu ku xirnaan doonaa xaaladdaada gaarka ah iyo baahiyahaaga. Wali waxaad awood u lahaan doontaa inaad tagto dugsi.

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025